

DIS107-SO

Haddii horaan laguugu galiyay tuubada maskaxda la galiyo tan iyo yaraantaadi ama haddii tuubada maskaxda la galiyo ay cusub tahay, waa inaad maareysaa oo aad daryeeshaa inta aad nooshahay.

Soo Sheegitaanka Dhibaatooyin

Shaqayn la'aanta tuubada la galiyo maskaxda waxay dhici kartaa da'a kasta. Caabuq ku dhaca tuubada la galiyo maskaxda ayaa dhici kara, caadi ahaan shaqaynta tuubada la galiyo maskaxda 6 bilood gudahood.

Astaamaha dhibaataada ay leedahay tuubada la galiyo maskaxda waxaa kamid ah:

- Madax xanuun joogto ah
- Yalaalugo ama matag
- Suuxdin cusub, ama korodhka suuxdinta
- Isbedelo ku dhaca aragga
- Isbedelo ku dhaca hurdada
- Xanaaqa ama isbeddelka dhaqanka
- Calool xanuun ama calool istaag aan caadi ahayn
- Daal
- Isbedelo ku dhaca hadalka
- Daciifnimo, kabuubyo ama xanxanto dhinaca xaglaha ah

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

- Isbedelo (oo ay ku jiraan casaan, barar ama kulayl) oo ku dhaca goobta qaliinka ee jarida ama qeybaha jirka ee ka sarreeya tuubada maskaxda la galiyo
- Qandho aan lagu sharixin oo dhacdo lix bilood gudahood ku shaqaynta tuubada maskaxda la galiyo

Haddii aad isku aragto dhibaatooyinka kore, isla markiiba wac Kalkaalisada Caafimaadka ee adeega caafimaadka ku bixisa khadka talefoonka [651-229-3890](tel:651-229-3890).

Ballamaha Ka warhaynta ah

Qaliinka Neerfaha

Waa muhiim in dabagal uu sameeyaa dhakhtarkaaga neerfaha 1-2 sano kasta. Adeeg bixiyahan waxaa laga yaabaa inuu u baahdo inaad raajo ama Magnetic Resonance Imaging (MRI) kaa qaado kahor ballantaada.

Dhakhtarka Indhaha

Waa inaad sidoo kale balan sannadle ah la yeelataa dhakhtarkaaga indhaha. Hubso inaad sheegto inay kugu jirto tuubada la galiyo maskaxda, si dhakhtarkaaga indhaha uu kaaga baadhi karo bararka unugyada araga (barar isha, calaamad suurtoagal ah oo ah cilad ku timaada tuubada la galiyo maskaxda). Fadlan keen natiijooyinka booqashadii dhakhtarka indhaha ee kuugu dambaysay balantaada dhakhtarkaaga neerfaha.